Waaxda Adeegyada Dadweynaha Degaanka

# Qaybta Adeegyada Naafanimada Maskaxda iyo Korriinka

Multnomah County

## Dib u cusbooneysiinta • Tilmaamaha Tixraaca ee Degdega ah

**Si la iskahaSi la iskaga ilaaliyo kala go'a ku yimaada lacag bixinta**

Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka (ODDS) ee gobolka ayaa ku talinaya in aad **bilawdo codsigaaga(yadaada) dib u cusbooneysiinta 70 maalmood ama ka badan <u>ka hor</u> taariikhdaada uu dhacayo.**

**Lacag laguma siin karo haddii baaritaanka taariikh dembiyeedkaada ama diiwaan gelintaada uu wakhtigoodu dhaco!**

### Dib u cusbooneysiinta Baaritaanka Taariikh Dembiyeedka (CHC)



Codsiyada CHC waxaa laga sameeyaa **<u>dhanka internet-ka oo kaliya</u>**. Codso codsiga CHC adiga oo foomka internet-ka ka buuxinaya qaybta Baaritaanka Taariikh Dembiyeedka ee website-kayaga https://www.multco.us/dd/idd-provider-resources.

Sidoo kale, waa in aad nuqulka labada dhinac ee Aqoonsigaaga email ugu soo dirto dd.backgroundchecks@multco.us. Waxaan kugula sii xiriiri doonaa email ahaan si aan kuugu qabano ballanta wicitaanka fiidiyowga ee caddeynta Aqoonsiga oo ka dhacaysa Google Meet.

***Faraha la iska qaado***: Haddii faraha la iska qaado 'fingerprints' loo baahdo, waxaan kugula sii xiriiri doonaa email ahaan oo ay la socdaan tilmaamo faahfaahsan.

Natiijooyinka codsigaaga CHC waxaa laguugu soo diri doonaa email ahaan

### Dib u cusbooneysiinta Codsiga Diiwaan gelinta Daryeel Bixiyaha (PEA) iyo Heshiiska



Buuxi **PEA** cusub. Foomka waxaa isaga oo ku qoran Ingiriisi, Isbaanish iyo Af-Ruushka laga helayaa website-ka Waaxda Adeegyada Dadweynaha ee Oregon:
**oregon.gov/odhs/providers-partners/idd/pages/psw-resources.aspx**

**Codsigaaga oo dhammeystiran u dir Waaxda Adeegyada Dadweynaha ee Oregon**
**Email-ka**: psw.enrollment@state.or.us
**Fax-ka**: 503-947-5044
**Boostada**: Department of Human Services
ODDS Contracts and Provider Administration Unit
500 Summer St. NE E-09, Salem OR 97301

## Su'aalaha?



**La xiriir Kooxda Aqoonsiga ee IDD PSW ee Degaanka Multnomah**

**Email-ka**: dd.backgroundchecks@multco.us
**Farriinta dhanka codka**: 503-988-9790 (farriinta dhanka codka oo kaliya)

*Email-ka iyo farriinta dhanka codka waxaa la fiiriyaa dhowr jeer maalintii inta lagu jiro saacadaha shaqada ee caadiga ah (Isniinta ilaa Jimcaha, 8:00 subaxnimo ilaa 5:00 galabnimo).*

Sawirradii [Storyset]